

Liiska Hubinta Dhammeystirka PACE

Haddii aad ka qeybgalaysid PACE –Adeeg **Bixiyuhu Wuxuu Heli Karaa Tababar Aqoonta Udhiganta** oo loogu talagalay bulshada – waxaad u isticmaali kartaa liiskan hubinta si aad ula socotid waxa u baahan in la dhammeystiro si aqoontan u dhiganta u buuxin karto shuruuda shaatiga waxbarashada.

DHAWAAN FILO! DCYF waxay asaasaysaa sidaad usii wadi kari lahayd wadada aqoontaada ee koolejka markaad dhammeysid PACE.

Miyaad caawimo uga baahan tahay go'aaminta haddii tani kugu haboon tahay? Isticmaal Hagaha Professional Development Plans (Qorshayaasha Horumarinta Xirfada, PDP) ee Adeeg-bixiyayaasha Waxbarashada Barbaarinta si aad waxbadan uga ogaatid PACE iyo ikhtiyaarada kale ee la heli karo. Xasuusin ahaan: PACE waa ikhtiyaar loogu talagalay doorarka u baahan shahaado hore ama kooban –shaatiga guriga qoyska, macalinka hogaanka ah, ama kalkaaliyayaasha macalimiinta.

Ka fiiri buuga hagaha PDP: <https://dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/pdpGuidebook.pdf>

Dhammeystirka Tababarka – Aqoonta u Dhiganta Shahaadada Hore

Liiskan soo socda ee dhammaan tababarada waa in la dhammeystiraa kahor intaan PACE loo tixgalin dhammaad. Kani waxa loo isticmaali karaa hage gaara ahaan si aad ula socotid horumarkaaga.

Tababar	Qeybaha	Taariikhda Dhammaadka
Child Care Basics (Asaasiyaadka Daryeelka Carruurta, CCB)	Qeybaha 1-10 ama aqoonta u dhiganta	
Enhancing the Quality of Early Learning (Kor u Qaadista Tayada Waxbarashada Dhalaanka, EQEL)	Qeybta 1 – Daryeel-bixin Waxtarleh iyo Dhisida Maskaxda	
	Qeybta 2 – Isdhexgalka & Deegaanka, iyo Caawimooyinka Hab-dhaqanka Haboon	
PACE – Qeybta Early Care and Education (Daryeelka Barbaarinta iyo Waxbarashada, ECE)	Turjumida Waxbarashada – 7 saac <ul style="list-style-type: none"> • Xeerarka Waxdhigista Taxadirkaleh • Turjumida Waxsoosaarka • Hadaf Dejinta 	
	ECE Hore & Hadda – 9 saac <ul style="list-style-type: none"> • Taariikhda ECE • ECE Dejinta • Siyaasada & Ololeynta 	
	Aqoonta Waxbarashada Barbaarinta – 4 saac <ul style="list-style-type: none"> • Horumarinta Macalinka • Qiyamka & Anshaxa 	
Taageerida Horumarinta Canuga iyo Badqabka	Horumarinta Caruurta – 6 saac <ul style="list-style-type: none"> • Horumarinta Caruurta • Taageerida Hab-dhaqanka 	
	Caruurta & Qoysaska – 8 saac <ul style="list-style-type: none"> • Heerarka Koboca Carruurta • Hawlaha Qoyska 	
	Baqbabka Caruurta – 6 saac <ul style="list-style-type: none"> • Caafimadka & badqabka • Kor u Qaadista Badqabka 	



Kawaran haddii aan ka maqnaado fasalka?

Haddii aad ka maqnaatid kulanka tababarka, fadlan la shaqee tababarahaaga gobolku ansixiyey si loosoo kabo kulanka. Dhammaan kulamada waa in la dhammeystiraa si loo helo dhibco.

Dhammeystirka Shaqo Dheeriya

Buugaagta shaqada waxa dhammeystiraya oo dib u eegaya tababaraha.

Dhammaaday: _____

Shaqada Ku Saleysan Waxbarashada waxa dhammeystiraya oo dib u eegaya tababaraha.

- Hirgalinta hawlaha shaqooyinka uu dhammeystiray dibna u eegaya tababaruhu.
- Saacadaha shaqada waxa lagu diwaangaliyaa warqad gaara waxaana xaqiijiyaa tababaraha.

Dhammaaday: _____

Tani waxay dhammeystiraysaa aqoonta u dhiganta Shahaadada Hore ee ECE ee Gobolka Washington ee shaatiga.

Ka firi hoos ikhtiyaarada horumarina xirfadaha ee joogtada ah.

Haddii lagaaga baahan yahay inaad haysatid Shahaadada Kooban ECE ee Gobolka Washington doorkaaga, waxaad haystaa labo ikhtiyaar:

- Dhammeystir PACE adoo maraya Shahaadada Kooban. (filo 2023!)
- Kaqeybqaado koolejka si aad u dhammeystirtid koorasyada dheeriga ah ee Shahaadada kooban markaad dhiganaysid koolejka.

Dhammeystirka Tababarka – Aqoonta u Dhiganta Shahaadada Kooban

PACE oo ah aqoon u dhiganta iyadoo la marayo Shahaadada Kooban ayaa lasoo saarayaa 2023. Liiskan hubinta waxa la cusbooneysiin doonaa mardanbe si loogu daro tababarada dheeriga ah ee la dhammeystiraayo.



Haddii aad rabto nuqullo dukumeenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan la xidhiidh DCYF Constituent Relations (Xidhiidhada Qaybaha) (1-800-723-4831 | 360-902-8060, ConstRelations@dcyf.wa.gov).